# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 09:53 AM** **Hansard No.21/2** **Kal-fadhiga 21[aad] fadhigii 4[aad]**

***29/04/2013***

**Md. Baashe Maxamed Faarax Gudoomiyaha: -** *Waxaa Fadhigan inoo Marti ah Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Saraakiisha Ciidamada Wasaaradaas hoos yimaada, si ay Warbixin inooga siiiyaan hawlaha ay Qaranka u hayaan Su'aalana uga weydiino, Marka hore Wasiirka waxaan ku soo dhoweynayaa.*

**Md. Maxamed Nuur Caraale (Duur)Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha:-**

***14 minute and 28 sec***. Mudanayaal waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa salaan, anigoo safara ka soo noqdey hadana igama reebayso inaan Golaha hor imaado, si aanu xilka aan Qaranka u hayno wax nalooga weydiiyo, taas oo Goluhuna xaq iyo awood u leeyahay, Mudanyaal si aan waxqabadka iyo la xisaabtanku ulumin waxaa hortiina taal Waxqabadkii Wasaarada Arrimaha Gudaha saddex biloodkii tagay ee sanadka aynu ku jirno bilihii January, February iyo march  iyadoo cadeynta waxqabadkasta uu sawir kala socdo muujinaya, warka iyo xaalada dalkana waxba idinkuma seegana, waxaan filayaa warkeygu wuxuu noqonayaa waxaad ogtihiin ma idiin sheegaa, wixii gaar loo goconayona su'alahaad ku xusidoontaan.

Wasaarada Arrimaha Guduhu waxay ka kooban tahay dhowr qeybood oo waaweyn, waxaa kaloo Wasaarada hoos yimaada 3 Ciidan iyo Maamul Gobolada iyo Degmooyinka waxaana fadhiga igu waheliya Taliya Ciidanka Bileyska, Taliyaha Ciidanka Bada, Taliya Laanta Socdaalka, waxaa kaloo Halkan igu weheliya Agaasimaha Guud ee Wasaarada oo ay hoos imanayso dhamaan Maamulka Gobolada iyo Degmoyinka isagoo technitionka hawshaa wada, Mudanayaal Shaqada Wasaaradu wuxuu noqonayaa marka si kooban loo sheego laba arrimood oo kala ah

- Sugida aminga Gudaha iyo sugida Deganaanshaha iyo Shuruucda.
- Kobcinta iyo Fidinka Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka dalka.

Markaa amingii adeegayaal buu leeyahay saldhigna waxa u ah 3 ciidan ee aan xusay, sidoo kale Madaxdhaqameedka maadaama aynu nahay umad dhaqan leh, Madaxdhaqameedku waxay ka mid yihiin halbowlayaasha Sugida nabadgalyada si gaara waxaan u xusayaa Madaxdhaqameedka iyo Golaha

Guurtida, ilaahay Mahadii Nabadgalyo taama ayaa manta dalka ka jirta, ma jirto Nabadgalyo xumo ama asbaab colaadeed oo saameyn inagu haysa, ku faanimeyno oo ilaahay baa Mahadaa iska leh, waxaa hubaala adeegayaasha aminga aanay waxba hagran dheerina ku dareen inagoo og facilitieska iyo dhaqalaha ay ku hawlgalaan.

Waxaa iyana jira Maamulkii Gobolada iyo Maayiradii Degmooyinka ilaa heer uu Maamul dhisan oo ka hawlgala fidintii iyo Balaadhintii Maamulka Gobolada iyo Degmoyinka, waxaa intaa barbar socota in Maalin walba la tayeynayo Adeegii amniga iyo adeegii Maamulka, waxaana hortiina taala oo aan idiin soo gudbiyay saddex biloodka wixii ku qabsoomey, waxaa hortiina taal 18 pagge waraaq aan ka yareyn, waxaas waxaa si kooban ugu qoran 3dii bilood ee tagay sanadkan wixii noo qabsoomey,

Booliiska 13/3/2013 waxaa tababar ugu xidhmay dufcadii 2aad ee Ciidanka sida gaarka loo tababarey ee RRUda, ciidankaa waxaan u xidhnay 100 ka mida tababrkaa sida sawrikoodii iyo Muuqaalkoodiiba uu uga muuqda Waraqahan, dufcadaas 2aad waxay wax weyn ka badaleen Sugidii aminga dalka gudihiisa, waxay wax weyn ka tareen haybadii iyo sumcadii Ciidanka Booliiska, insha'alaha waxaa noo qorsheysan Ciidanka Gobolada dalka oo dhan in lagu fidiyo ciidan heegana oo aan saldhigyada iyo ku mashquul ahayn oo diyaara si ay u fuliyaan hawlgalada kala duwan ee looga baahdo,

04/03/2013 waxaa loosoo xidhay tababar 150 Ciidan Booliis Dumar oo dhalinyaro ah oo ciidanka ku soo biirey si ay dhinacyo badan uga qeyb-qaataan maadaama bulshadu Rag iyo Dumar isugu jiraan, sidoo kale dhalinyaronimadu iyo aqoontu waa wax der-dergalinaya hawsha, iyadoo aanay warbixinta ku jirin inamo badan oo sanadkii hore ka baxay Tababarka Ciidanka booliiska oo aanan dib ugu noqneyn, waxaa socda Burco iyo Hargiesa 2 saldhig oo waaweyn oo Police Station oo dhismahoodii wali socdaa, markaan leeyahay Saldhigyo ama Police station waa saldhigyo casriya oo yeelanaya qalabki iyo adeegii looga baahnaa Fulinta hawlaha Booliiska.

Waxaa waxbarasho aqooneed u socdaan Ciidanka Baadhista Danbiyada oo Hablo iyo Wiilalba leh iyagoo qeybo ka mida la baridoona waxyaabo la xidhiidha baadhista danbiyada falalka argagixso, Markaa taana tababaro xoogan baa socda, waxaa xusid mudan Magaalada Hargeysa waxaa tababaradaa bixinaya khubaro aqoonyahano ah oo leh aqoon arrimahaa la xidhiidha, waxaa manta si weyn loo qalabeeyay dhamaan Madaarada dalka iyo Goobaha Xuduudaha dalka laga soo galo, iyadoo la sameeyay isku xidhweyn oo Database ah oo qofkasta oo dalka soo gala Xarunta Guud ee Laanta

Socdaalka laga daawaynayo, waxaa la sameeyay Program loo yaqaan *(Personal Identification Registration system)* **PIRS**.

Waxaa kaloo la dhigay Madaarada Qalab xaqiijinaya ama saxaya Passportska iyo waxyabaha kale ee lagu dhoofayo, Ciidanka Nabadgalayada Bada waxaa loo dhisey Xarumo Cusub oo ka kooban 5 xarumood, waxaa kale oo loo dhisey Xarunta Guud oo qaaddi doonta 250 qof ay jiifsan doonaan oo berbera laga dhisey, waxaa kaloo 5 goobood laga dhisey  iyadoo xeebaha dhan lagu taxay Ciidamada nabadgalyada si ay u sugaan aminga bada, sidoo kale ciidanka Badu waxay ku guuleysteen hawlgalo ay galeen oo ay wax kaga qabteen argagixisada iyo kaluumeysiga bilaa sharciga ah, waxaa kole oo jira iyana Tababaro Ciidanka bada lagu tayeynayo oo u socda.

Waxaan iyana dulmarayaa Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka dalka, waxaa dhowaan la soo doortey ee dalka oo dhan ka dhacdey, iyadoo Wasaarada Arrimaha Guduhu qaban qaabisey Tababaro kor loogu qaadayo aqoonta iyo kartida Mudanayasha iyo mayirada la doortey oo hortiina yaala intaas oo tababar si kartidooda iyo waxqabadkooda kor loogu qaado, waxaa kale oo hortiina yaala Mashaariicda JPLG oo 7 degmo ka socda inta degmo kasta ka heshay ayaa hortiina taala iyo lacagta wixii Xukuumada Dhexe ku kabtey.

Wasaarada Arrimaha Gudaha Xarunta waxaa ka socda Dhisme cabirkiisu dhanyahay 14714$M^2$, waa xarun aad u balaadhan, marka si kale loo dhigo waa 97 mitir dhinaca kalena yahay 155.7 mitir, iyadoo ay socdaan qeybo ka mida oo loo dhisidoona dhisme 3 dabaq ah, waxaa kaloo socda Masaajid, waxaana dhamaadey Deyrkii iyo qolalkii baadista iyo wardiyaha, markaa xarun balaadhan bay yeelan doonta Wasaarada arrimaha Guduhu, waxaa kaloo socda mashaariic badan oo Gobolada ka socda iyadoo Maamulka Gobolada iyo degmooyinku qeybtooda ka qaadanayaan horumarinta iyo der-dergalinta waxqabadkooda.

Waxay Wasaarada Arrimaha Guduhu ku guda jirtaa diyaarinta Qorshaha diiwangalinta muwaadiniinta ee Macluumadkaadka madaniga ah, maaha Voter registration ee waa Citizenship registration way no dhowdhowdahay waxaanu bilaabeynaa tijaabadii iyadoo ay tahay hawl culus, waa in la diiwaangaliyo qofka Muwaadinka ah dhalashadiisa, muwaadinimo, aqoonsigiisa iyo macluumadkiisa taaso oo wax weyn ka tarikarta Sugida amniga, waxaa iminka bilaabeyna inaan ku tijaabino 3 degmo awooda inay Wasaarada arrimaha Guduhu qaban karto, waa hawl aduunkoo dhan ka socota waxaan ka qeybgalnay shirar badan oo laga hadlayo in dalalkaasi sameeyay si xidhiidhka kor loogu qaado.

Waxaa inta badan la isku khaldaa shilalka iyo danbiyada, Aduunyada Shil iyo danbiyadu way kala duwanyihiin oo waa laba wax oo kala duwan, shilalku way dhacaan sidoo kalena dambiyadu Somaliland way ka dhacaan oo siday aduunyada uga dhacaan bay uga dhacaan, laakiin jaantuska hortiina yaal wuxuu muujinayaa in hawgalka booliisku aad u weynaa oo 99% ku guuleysteen, wayo dil kasta oo dhaca halka 10 gacan ku dhiigle oo dilgeystay waxaa baxsadey mid ama laba gacan ku dhiigle.

Mudanayaal runtii Warbixintu hortiina taal oo 3 biloodkii hore ka kooban, waxay muujineysaa in intaanan hortiina iman ay wax noo diyaarsanaayeen oo hore waxayagu noogu diiwangashanaa, wixii intaa dheer su'aalihiina ayaan u deynayaa, oo aad kaga bogan doontaan, aad baad u mahadsantihiin.

***<u>Su'aalaha Mudanayaasha.</u>***

**1. Md. Ibrahim Mahdi Buubaa:-**

**Su'aal:-** Anigoo aad ugu faraxsan ajiibidaad Golaha ku hor-timi, su'aasha 1aad sida warbixintada ka muuqatey bulshada iyo Golayaashuna lala socdey waxaa dalka ka dhacay dilal baahsan, oo booliisku wax ka geysteen, sida lughaya, Saylac, boorame, Hargeisa, Berbera iyo Caynabo dhamaana waxaa fuliyay oo ka qeybqaatey Ciidanka booliska, Mushkiladuhu markay dhacaana si uun baynu u xalinaa, ama dawladihii idinka horeyn jirey u xalin jireen, waxaa jirta inaan la marin sidii ugu fiicnayd ee loo xalin lahaa iyo qaababkii la mari jirey ee Guurtiyenta ahayd, markaa Maxaa sababay ee lagu waayay xal in loo helo mukhkiladahaas?

**Su'aal:-** Waxaad la socotaan tahriibta balaadhan oo dhalintii wadanka ku dhacay waxaa jira cid isku xidha oo ka ganacsada ilaa Gobolada dalka oo ah shabakad Halkan ilaa adis isku xidhan, markaa wax ma qabateen mase idiin qorsheysantahay shabakadas inaad wax ka qabataan?

**Su'aal:-** Waxad sheegtay inaad sameynaysaan Civil registration waa run waa wax Qaranku u baahanyahay, waxaad dadka u cadeysaan in aad damacsantihiin inaad hadhow voter registration u badashaan macquulse ma tahay? Maxaase ilaa iminka voter registrationkii loo qaban la'ayhay, sax ma kula tahay inaad qaadato doorkii Komishanka Doorashooyinka?

**Wasiir Duur.**

**Jawaab:-** Hadaan intaan ka maqlayay su'aalaha ka jawaabo, Waxaad moodaa intii qaranimadu sharaf lahayd inuu qoonsaday Xildhibaanku, wuxuu ilaabay adeerkayo Xaaji Cabdi waan xasuustaa maalintii la furayay idaacada wuxuu yidhi dawladnimadu waa xadhig, Casilaad iy dalacsiin bal xikmada ku jirta eeg in booliisku joogo goobkasta oo wax ka dhacaan waa sharaf inaad bogaadisaa bay ahayd, wixii doonaa ha ka dhacaane, dil wuu imankaraa, sharafta iyo nabad jirtaa may muuqateen hadanay Ciidanka Booliisku dhaxanta u taagneyd, taasina may sababin laakiin sababta dhacdey oo iyagu may abuurin, haday iyagu mushkilada abuurayaan meeshan manta sidaa umaad fadhideen.

**Jawaab:-** Xadhiga saxaafada horta saxaafadu halkan bay ugu xorbadan tahay aduunkoo dhan hadaad eegto oo meel ay kaga xorbadan yihiin ma jirto, lkn suxufigu danbi wuu gali karaa, saxafiguna danbi wuu gali karaa, masuulkuna wax ma xidho ee sharcigaa xidha.

**Jawaab:-** Tahriibtu maaha aafo iminka bilaabantahay ee waa mid soo taxnayd mudo dheer, waa lala dagaalamayaa oo inta laga qaban karo waa laga qabanayaa, waxaana sababay shaqo la'aanta baahsan, xukuumadana waxbadan bay shaqo abuurista ka qabatey waana la sii kordhinayaa, sidii arrinkaa loo xalin lahaa oo dhalinyarada shaqo loogu abuuri lahaa.

**Jawaab:-** Civil registrationka, sharci baa na siiyay inaan diiwaangalino dadweynaha oo xeerka jinsiyada ayaa Wasaaradan awood u siiyay, voter registrationka maaha roleka wasaarada ee waxaa awoodiisa uu xeerka diiwangalintu siiyay Gudidda Doorashooyinka Qaranka haday warqad Madaxweyne u qoreen maan arag kamana jawaabayo, xeerka wali maanaan keenin, waxaan horta ka horeysiinaynaa tijaabo inaan qaadno, Wasaarada Arrimaha Guduhu waxay la timi niyadii inaan wax qabano in nalaku taageero weeyaan, Xeerkana waanu keenaynaa oo waxaan Golaha in ansixina ma suurtagaleyso.

**2. Md. C/karimm Aw Cali Shabeel:-**

**Su'aal:-** Mudane Wasiir anigoo ka turjumeya guuxa dadkeena iyo dareenka shacabka, waxaa jira had iyo jeer dhul la isku qabsado oo cabashadeeda iyo tabashadeeda taagantahay Garsoorku markuu xukumo ay u soo gudbiso Wasaarada Arrimaha Gudaha oo aan la fulin Go'aanka Maxkamada, taasina maalin walba taagan tahay mushkiladaasi iyadoo dhulkii la xukumay ay hadana taagan tahay oo dilal iyo dhibaato keeanaan, arrintaasi maxaa sababay?

**Su'aal:-** Sida aynu ka warhayno  waxaa la isku badalay Gudoomiyayaasha Gobolada, hadana waxaa laga hadlayaa in Gobolada qaarkood aan la dhameystirin oo wali cidii u dhalatay ay Gobolada wali u jooogaan qaarkood, maxaase sida Tan gobolada? Waxaan kaloo daba dhigayaa hadii Gudoomiyayaashii Gobolada la isku badalay Maxaa idiinka yaal District commissioners, oo iyana la isku badalo dadku aad bay u danaynayaane Maxaa Idiinka Qorsheysan?

**Su'aal:-** Magaalooyinka waaweyn sida Hargiesa ama Burco xaafaday ka kooban tahay sida hargeysa oo 5 xaafadood ka kooban, awal xaafada walba waxay lahay district commission, markaa waxaa jira degmoyin dad yar ku noolyahana ay leeyihiin gudoomiye sida darasalaam oo kale, Xaafad sida 150ka oo kale oo aad uga dadbadan aan la garanayn meel laga xukumo, Maxaa taana idiinka yaal oo Magaaloyinka Waaweyn loogu sameyn waayay Gudoomiyayaal Xaafadahay ka kooban yihiin?

**Wasiir Duur.**

**Jawaab:-** Fulinaha Maxkamada waxaa jira Fulino badan oo aan la hirgalin mudo badan xukuumadii hore ilaa hada, Wasiirkii iga horeeyay ilaa 3 fulinood ayuu sameyay intabana dagaal dhimasho ayaa ka dhacay, fulintii ayaa dhib abuurtey oo dagaal bay noqotey, waxaan dooranay in wakhti ay kala dagantahay aan sameyno oo doorashooyinka ayaa la is dhaafinayay, Markaa hawshaasi waa mid noo taal oo shalay u danbeysay ayaan wadnay Mudane?

**Jawaab:-** Isku badalkii Maamulka Gobolada runtii aad baa loo bagaadiyay, labo Gobol ayaan la isku badalin iyana waan isku badalaynaa insha'alah, Degmooyinka iyaga doorashaa lagu yimadaa, Xaafadaha Hadii khaladkaasi jiro wanu baadhaynaa waxna waan ka qabanaynaa, waxaa kaloo la isku badalay taliyayaashii Goobaha oo iyana loo baahday, Degmooyinka Doorashooyin bay ku yimadeen Gudoomiyahaashu, Xaafadahana waxaa magacaaba Duqa Magaalaada, haday jiraan sidaad sheegteyna Mudane waxbaan ka qabanaynaa.

**3. Md. Cali Maxamed Aadan:-**

**Su'aal:-** Xeerka Gobolada iyo Degmoyinka 23/2002 Qodobkisa 8$^{aad}$ wuxuu tilmaamayaa in degmooyinka D iyo C ama Gobolada  Cusub ay xukuumada waajib ku tahay in 2 bilood gudahood qiimeyn lagu soo sameyo oo labada Gole ee Barlamaanka la horkeeno, waxaa jira 7 Gobol la magacaabay oo shaqeya lamana qiimeyn oo lama sharciyayn, dhaqala ku baxa, mana sharciyeysna,

Qodobkaasina wuxuu tilmaamayaa in 2bilood gudahood lagu soo qiimeyo, waana waajibaadkii 1aad ee Wasaarada Arrimaha Gudaha sida Xeerka dhigayo Qodobka 103aad sidaas oo kale ayuu u cadeynayaa, arrintaasi oo qaranka dhib ku haysa haday nabagalyo tahay dhaqaale tahay iyo haday Maamul fulintahay, maxaad u suuragalin weydeen?

**Su'aal:-** Xeerka Gobolada iyo Degmoyinka 23/2002, kala xadeynta Gobolada iyo degmoyinka Qodobka 7aad ee Xeerka wuxuu tilmaamaya Xuduudaha Gobolada iyo Degmooyinka, Gobola la isku haystaa oo doorashooyinkii qaarkood aanay ka dhicin Maxaad u kala-xadeyn weydeen Gobolada iyo Degmooyinka oo dhibaato weyn ingau haya?

**Wasiir Duur.**

**Jawaab:-** Wuu Mahadsanyahay Gudoomiyuhu, runtii si kooban baan uga jawaabayaa, Xeerkan Lr/23 waxaa la hirgaliyay 2002 wuxuuna jabay Qodobkaasi 2004kii oo ahayd wakhtigii Xeerku qabtey in la hirgaliyo, Qodobkaa 8aad wuxuu jabay wakhtigaa ilayn muda la qabtey anaguna waxaanu hawsha la wareegnay iyadoo Qodobkii jabanyahay10 san ka bacdi, Markaa hadii Qodobkii jabay anaga 2 arrimood baa na horyaal oo culeysa, xukuumadii markaa jirtey intii jirtey waxay ku biirisey Gobolo iyo Degmooyin cusub iyadoo Qodobkii jabanyahay wakhtigaa Mudanaan ahaa oo rag badan ayaan wada soconay waxaan ahaa qofkii kowaad ee ka qayliyay arrinkaa ee yidhi Goboladii Culeys baa lagu biiriyay runtii culeyskaas ayaa nooyaal, Culeyska iyo Kala-xadeyntii Gobolada iyo Degmooyinka waa wax inoo wadayaal oo Wadatashi Qaran u baahan, lix Gobol baa sharciyada aynu shaqeynaa la aqoonsanyahay oo Wasaarada Arrimah Guduhu ku shaqeysaa, sidoo kale 7 Gobol oo cusub baa ku biirey, madaama Goboladii hore kala xadeysnayn Doorashadeena iyo maamulka oo dhan waxay ku socdaan 6 Gobol oo hore, Kala xadeynta iyo Goboladaa iyo Kuwa cusub waa Mid Wadatashi Qaran u baahan oo inoo wada taal ayaan qabaa anigu.

**4. Md. Xasan Cawaale Caynaan:-**

**Su'aal:-** Mudane Wasiir iyo taliyaha Ciidankaba waxaan idin weydiinayaa, waxaa jirta dhalinyaro habeenkii ilaalisa xaafadhaha, dhalinyaradaasi xoogaa lacaga ayay xaafaduhu siiyaan, dhalinyaradasi ma idiin diiwangashahay wax tababar ahna ma siisaan?

**Su'aal:-** Dhalinyarada Kubada Ciyaara, markay ciyaarayaan way islaayaan, markaa waa laganaaxa dhaliyarada oo lacag baa lagu ganaaxaa, Ganaaxaasi intuu dhanyahay xageyse sharciga kaga jirtaa?

**Su'aal:-** Waxaad noo sheegtay inaad diiwaangalin qabanaysaan Mudane Wasiir, Markaa diiwaangalintaa Ma dawlada hoose ayaa qabanaysa mise Waaxaha Wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa qabanaysa?

**Taliyaha Ciidanka Boliiska:-**

**Jawaab:-** Marka hore waan idin salaamaya, salaam ka dib, mdune aad baad u mahadsanayahay, hadaan ku horeeyo, dhalinyaradaasi waxay u diiwangashanyihiin saldhigyada booliiska dhowr jeerna iyaga laftgooda sidii loo shaandheyn lahaa ayaan hawsheeda ku jirnaa.

**Jawaab:-** Bishii March iyo horaantii April runtii hawlgalo ayaan ka fulinay magaalooyinka, hadaan Hargeysa soo qaato dhalinyaradu markay ciyaaraan kooxo ayay isu layn jireen markay ciyaartu dhamaato ama waxaa jirey dhalinayaro la magacabaxay hadaan tusaale u soo qaato Qaaxo, Arsenal iyo wax la mida, markaa labadaa bilood ee ugu danbeeyay ciidamada booliisku waxaanu qaadnay hawlgalo lagu soo qabtey dhalinyaro farabadan, dhalinyaradaa marka naloo keeno waxbay burburiyaan ama fal bay geystaan markaa taas si toosa ayaa Maxkamada loogu horgeeyaa oo lagu dacweeyaa, kuwa kale Xeerka Anshaxa ee aad ansixiseen ayaan lagu qaadaa, Xeerkaa Qodobkiisa 8aad wuxuu sheegayaa in marka hore 1 bil la xukumo markuu dhameysto bishaana waxaa loogu daraa ganaax ay maxkamaduhu uga daraan, intaa kuma dayno dedaalka waxaan la shaqeynaa odayaasha iyo dadka waaweyn oo xidhiidh la sameynaa si aan u wacyigalino oo aan adeyg iyo xadhig ugu deyn.

**5. Md. Baar Siciid Faarax:-**

**Su'aal:-** Wasiir waxaan deganahay Xaafada Goljano, maalintii ayaa loo soo dhacaa iska daa habeen waliba 9-10ka maalinimo ayaa marka la ogaaday inaan dad waayeela aanu joogin oo caruur looga tagay loo soo dhacaa, xarunta booliiska noogu dhow waxay noo jirtaa ilaa 1000 talaabo, dhowr jeer waanu la socodsiinay booliiska, wiigan ayay dhacdey gabadh guriigii suuqa adeeg ka doonatay ayaa 10kii loo soo dhacay, arrinkaa waa arrin soo noqnoqdey waxna lagama qaban, maxaa wax looga qaban waayay.

**Su'aal:-** Waxaa jira Wasiir Mashruuc Horumarineed JPILG oo Degmooyinka la siiyay Gobolka sanaag Degmo kaliya laga siin waana gobolkii ugu balaadhnaa, markaa iyadoo waxyaabo kalena jiraan oo Wasaaradaha kale aanay waxba ka qaban, Gobolka maxaa loola shaqeyn wayay ma dibaa looga soo guranayaa?

**Su'aal:-** Wargeysa baa loo dhacay habeen dhoweyd oo niman boolis ah ayaa u dhacay midna waa la qabtey halkay baadhistaasi maraysaa, Maxaadse ka qabateen?

**Su'aal:-** Xaafada aan deganahay markaan ku noqdo iskuulo ayaa ku yaal 26 june iyo Gacma dheere, Xashiishka lagama guro xaafada siiba iskuulada, xashiish badan ayaa yaala waana wakhtigii roobka, maxaa wax looga qaban waayay?

**Wasiir Duur.**

**Jawaab:-** Mashruuca JPILG wxuu ka socdaa 7 degmo oo wax aad u yar runtii aad bay u yartahay marka degmooyinka dalka oo dhan la eego oo ah 23 degmo, sanadkan ayaan fursad u helnay inaan ka hadalno oo aanu codsanay in 2 degmo oo ah Ceergaabo iyo Saylac in lagu daro way suuragaliweyday oo hay'aduhu noogu cawdeen  oo waxay yidhaahdeen iminka ma gali karno kuwii hore waxyaabo ka dhiman ayaan dhameystireynaa, runtii markaa waanu u dedaalnay anagu, ceergaabona waan u dedaalnay lagaman maarmo Mudane oo waa Gobol baaxadweyn.

**Taliyaha Ciidanka Booliiska.**

**Jawaab:-** Dambiga Falkiisu habeen iyo maalin ma kalalaha, Mudane Baar Siciid adigoo mahadsan waxaan kuu sheegayaa Bishan oo kaliya waxay booliisku qabteen 82 tuug oo xabsiyada dalka kula xidhan kuwaas oo qaarna la xukumay qaarna ay sugayaan, arrintan Goljanona waan ka daba tagayaa waxna waan qabanaynaa.

**Jawaab:-** Waxaa 24/04/2013 habeenkeedii loo dhacay oo la weeraray Xarunta Wargeyska Hubaal,  labadii eedaysane mid waa la qabtey midna wuu baxsadey wuxuuna ahaa askari booliisa laakiin dabigiisu waa mid u gaara, kan la qabtey dacwadiisii waa lagu jiraa, kan baxsadeyna waanu ku daba jirnaa oo arrinkaa si dhakhso ah ayuu noogu soo afjarmayaa.

**Wasiir Duur.** Waxaan ku kabayaa Xashiishkaa Baar ka cabatey Dawlada Hoose ayaan la socodsinaynaa, waayo waa cabasho dawlada hoose ayaan u sheegi inay bal goobahaa aad sheegtay si dhakhso ah wax uga qabato.

Waxaan kaloo ku kabayaa arrinkaa ka dhacay Wargeyska Hubaal xaajadaasi waa fal aad u fool xun nidaamka dawladeed iyo dhaqankeena soo jireenka ah wuu ka baxsanyahay ninkaasi isagoo ah sarkaal booliiska ka tirsan hadana ma dhaceyso in booliisnimo lagu taageero waliba wuxuu leeyahay culeyskiisa lagu culeysiinayo, qoflka booliisku wuu khaldami karaa sida qofka shicibka ah

oo dambigiisa sidiia ayaa loogu qaadayaa oo dambigiisu wuu ka culusyahay qof caadiya, qofkani dambiguu galay isagay u gaar tahay, waana xaaraan in qof masuula lagu xajiimeeyo waana ka digaynaa cambaareyntaa sida shalay rag masuuliyiina ahi idaacadaha uga sheegayeen, arrinkaana aad baanu awood u saareynaa.

**6. Md. Cali Xasan Maxamed:-**

**Su'aal:-** Mudane wasiir waxaa warbixintiina ku jirta in booliiksa ayaad badiseen oo dhowr dufacadood aad soo kordhiseen oo rag iyo dumarba leh, waxaa meesha ku jirta oo aynu u baahanahay oo meesha ka maqan Sarakiil waliba academic ah waxaynu ognahay Dalkii Somalia waxaa wadamada loo dirijirey Saraakiil waxay ka soo noqon jireen iyagoo khibrad badan leh oo lagu soo tababarey haday tahay Baadhista dambiyada iyo aqoonta booliisku u baahanyahay, mudadaa aynu jirney maan maqal haday jirtona waad noo sheegi doontaan Saraakiil Dibada lagu soo tababarey, Ma ka codsateen ama ma ina siiyeen saraakiil ajnabi ah oo inoogu filan inay ciidamo intaa le'eg hogaamin sii hogaamiyaan, inagoo og inay sii yaraanayaan Saraakiil Ciidamada sii hogaamin kara?

**Su'aal:-** Bari dhoweyd waxay dawlado waaweyn yidhaahdeen ha ka soo baxaan dadka u dhashey ee jooga ama aan loo safrin wax ma ka soobaxeen xidhiidhadii aad la sameyseen siiba taladii wadama ingriiisku ka mid yahay sheegeen oo ahayd in dadka u dhashey ay ka so baxaan wadanka Somalia siiba xamar, hadana laba wiiga ka dib Safaarad bay ka furatey oo shaqaale badan bay geyeen, waa laba arrimood oo aan is qaban, Markaa arrinkaas wax ma ka soo kordheen?

**Wasiir Duur:-**

**Jawaab:-** Mudanuhu aad buu u mahadsanayahay, waxaa warbixinta ku jirtey inay waxaynu dalka gudihiisa ku qabsan karaynay qabsanay, waxaanu codsanay in naloo tababaray oo dawlada itoobiya naga ogolaatay ilaa 100 qof dhowaana rajaweyn baanu qabnaa inay u baxaan oo soo tababaraan, sidoo kale dawlada ingriiska oo nagala qaybqaatada tababarada gudaha oo askarta leylii sarkaal siisa in 4 saraakaal loo diro oo soo tababarto, wanu dareemynaa in aqoonta booliisku soo yaraaneyso markaa in jiil fiican la abuuro waa loo bahanyahay, waxaa jira rag yar yar oo tababaro ku soo qaatay itoobiya waanay muuqane oo soo baxay, iyana waxweyn ka taraya oo shaqeeya.

**Jawaab:-** Dawladaha waaweyn dhawaaq baa ka sooyeedhay in muwaadiniintooda aanay u safrin Somaliland, runtii waxbaa iska badalay ilaa 14 cidho ka hor oo aanu la kulanay Safiirka iyo safiir ku –xigeenka waxay yidhahdeen Somaliland waa lo safri karaa, lkn Somalia ay adagtahay waxaa iminka jirta waxa weeye in dib u egis lagu sameyey Cidanka Somaliland iyo hay'adaha, laakiin Somaliland waa loo safrikaraa, oo Somalia ayaan loo safri Karin, Wasiirka tagay muugalin Magaalada Muqdisho ee Madaarkuu ka noqdey oo calanka ingriiska ka taagey waana siyaasad, Waftiyo badan waa la filayaa inay yimaadaan dalka qaarkoodna wayba yimaadeen.

**7. Md. C/raxman Muuse Jaamac:-**

Su'aal:- waxaa jira dad had iyo jeer dadka farta ku fiiqa oo yidhaahda waa argagixiso qofkii marka lagu waayo maxaa la sameynayaa, mise sidii nabad sugida ayaa loo dhaqmayaa Burco waxaa dhacdey 7 wiil ayaa ku xidhan wax laga qabteyna ma jirto waxaana lagu haystaa farta lagu soo fiiqey, Xarunta CID ayaa lagu hayaa maxaa idiinka yaal qofka qof aan ahayn ku sheega argagixiso oo qof aan dambi lahayn farata lagu soo fiiqey?

**Wasiir Duur.**

**Jawaab:-** Mudane waa soo jeedin, suaal toosa maaha waxaa jirta dunida dhib argagixiso, qofka farta lagu tilmaamo booliisku inay qabtaan xaqbay u leeyihiin, laakiin baadhista iyo gudbinta Maxkamada loo gudbinayo ayaa cadeynaysa in qofkii dambi leeyihiin iyo in kale, dhibaana jirta oo cabsi ayaa jirta, cidgaarana farta lagu fiiqi mayo, insha'alaha inamadaana maan ogeyne haday dambi leeyihiina waa lagu qaadi hadii lagu wayona waa la iska sii deyn, wayna dhacdaa in cid aan dambi lahayn in la qabto laakiin marka lagu waayo waa la sii daayaa.

**8. Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-**

**Su'aal:-** anigoo og in ciidanka amaanku hawshooda si cad ugutaan waxbadana qabtaan, waxaynu hadana ku jirnaa xalaada waxaan la arkeyn la baadhaoyo oo in badan in laga taxadiro loo bahan yahay, waxaa loo baahan yahay qalab wax lagu baadho ama lagu tijaabin karo wixii khatar, waynu ognahay waxa xamar ka dhaca iyadoo ciidankii jooga laakiin waxaa ka maqan wixii lagu ogaan lahaa wixii khatarta ahaa, qalabkaasi qiimo badan malaha waana loo baahan yahay, ma inoo qorsheysanyahay?

**Su'aal**:- waxaynu wada hadal kula jirnaa iminka Dalka Somalia, Xaalad aynu caalamka u bandhigeyno inay ina aqoonsadaan, hadana waxaynaan qarin

karayn oo la dafirikarin ee jabhado leh ee cid is magacawday ah, Makula tahay in Wasaara ahaan Gudaheena mideyno?

**Su'aal:-** Waxaa ka jira Sool, Sanaag iyo buuhodle, ama hartigaba aan idhaahdo yaanan waxba afka ka dhowrin waxaa ka jirta xaalad ciidamaa mudoba oo ciidamo is horfadhiya iyo Jabahado Ciidamada horfadhiya iyo hawlo badan, Wada hadalkii Madaxweynuhu balanqaaday may fulin, Ciidana Ciidan ma horfadhiyi karo, Maxaa Qorsheheenu yahay hadii Gogoshiina Fuliweyday?

**Wasiir Duur:-**

**Jawaab:-** tan Ciidanka booliiska iyo qalabka waxaan u deynayaa Taliyaha, waxaan dib ugu noqonayaa arrinta Bariga ee Sool iyo Sanaag oo wax ka jira runtii aan qarsooneyn, siyaasada Xukuuumadu waxa weeye in wada hadal lagu wajaho oo Xabad iyo muquunin la isku dayin, intii Madaxweynuhu Gogosha balan qaaday wixii qabsoomey iyo qabyada jirtana waxaa badan qabyada, wali siyaasadaasi waa mid shaqeynaysa taasuun baanu fulinaynaa oo ah in Goboladaa nabad lagu wajaho, manta rajo fiican baa muuqata marka la eego xaalada Geeska ka jirta oo lagu wajihi karo, waxaa jirta dhaqdhaqaaqyo Sanaag iyo sool ka jirta oo sidaada carabka aan ku dhuftee xero Dhulbahante ka jirta oo ah inay doonayaan inay xaalada iminka jirta qiimeyaan, anana Nabadaasi iyo wada hadalkaas ayaanu wadaynaa oo ka daalimeyno, ciidankana waynu ognahay in aan laga maarmin, insha'alah waynu gaadhi doonaa inay midho dhalaan.

**Taliyaha Booliiska.**

**Jawaab:-** waxaan iminka kuu sheegayaa oo aanu haynaa qalabka marka laga hadlayo oo noo suuragalay qalabka Faraha (Fingure print), waxaa kaloo haynaa sheyga dambiga lagu galo sida toori ama qalabka kale si aanu u lumin, waxbadan baanu rajeynayanaa oo qorshaha noogu jira, waana loo bahanyahay.

**9. Md. Jamac Xasan Adan**

**Su'aal:-** Xildhibaanada waxay ka midyihiin haykalka dawladnimo waxyaabo badan oo nabadgalyada iyo Haykal dawladnimo ah bay ka shaqeyaan, askar baa meel walba la dhigay, oo hadaad is tidhaahdo hawlaha qaranka ula tag askarta meel laga maro lama helo oo aan waxbadan kaga cabanayno, Markaa askarta ma siisaan Wacyigalin Miisaanka ay kala leeyihiin dadku si la idiin helo?

**Su'aal:-** Dambiilamyaasha si loo ogaado in uu dambiile yahay iyo in kale, oo faraa laga qaadaa marka dambi lagu soo qabto si loo ogaado marka uu dambi kale galo, 10 sano ka dib oo kale inuu dambi hore galay, qalabkaa maan arag in qof dambi galay la yidhaahdo faraa ka yaala waligiina wuu jirey qalabkaasi, miyaanay ciidanku haysan? Maxaase idiinka yaal?

**Su'aal:-** Ciidankan Madaniga ah ee hore looga dhawaajiyay ee xaafadha ilaaliya iyaga laftigooda cabashaa laga muujiyaa oo xaafaduhu lacag mawada haystaan markey lacag ka waayaan iyagaaba u dhaca, markaa ma idiin qorsheysan yihiin inaad direys gaara siisaan si loo aqoonsado oo inay idinka mid yihiin?

**Wasiir Duur:-**

**Jawaab**: - dalku inuu nabadyahay waxaan ku garanayaa mudanuhu su'aashiisa oo ah xashiish iyo waxyaabo noocaas ah waana inaynu ilaahay ugu mahadnaqnaa alxamdulilaah, Runtii Masuuliyiinta dadka laga cawdaan ahay marka xafiiska loogu yimaado laakiin waxaan idiin sheegayaa Wiigii Masuuliinta Xildhibaanada waxaan siiyey maalinta arbacadda, 5 cishaan shaqynaa oo khamiista waa shirkii Wasiirada, Maalin Madax dhaqameedyadaan siiyaa salaasadaan siiyay, Sabtida iyo Axadna shaqadaan siiyay.

**Md. Dabl Point of order:-** waxa weeye Wasiirku halkaa intaynu ka ansixinay intuu albaabka furo ayuu ugalaa wasiirada, Marka Xildhibaanada lama yidhaahdo maalin baad leedihiin.

**Taliyaha Booliska:-** hadaan ka jawaabo su'aasha waxaan kuu sheegaya mudane waa secret, waayo waa baadhis, laakiin waxaan kuu sheegayaa inaan faraha qaadno, waxaan kaloo kuu sheegaya intii aan joogay dambiyada statisticska ayaan u sameynay, way jirtaa in halkii loo baahnaa aan la gaadhin oo waxbadan inaga dhiman yihiin.

***<u>Gudoomiyaha:-</u>*** *Mudanayaal Badan baa is qorey wakhtiguna waa goor dambe, Markaa intaas ayaan ku soo gababaynaynaa Fadhiga, Wasiirkuna wuu mahadsanyahay iyo Taliyayaasha Ciidamada Booliiska, Laanta Socdaalka iyo – Fadhiguna Wuu xidhanyahay.*

| Cawad Cali Maxamed | C/risaaq Siciid Ayaanle |
| --- | --- |
| Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada | Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------------ |